# Sidee Loo Saxaa Diiwaanka Lambarka Bulshada

Miiska ku jira


| | |
|---|---|
| Maxay muhim u tahay in dakhliga i soo gala si sax ah loo diiwaangeliyey? | 1 |
| Sidee ayuu u maqnaan karaa dakhliga i soo gala? | 1 |
| Maxaan yeelayaa haddii dakhligeygu qalad yahay? | 2 |
| Sidee ayaa Lambarka Bulshada kuu caawin karaa? | 2 |
| La Xiriirka Lambarka Bulshada | 2 |


Haddii aad tahay 18 jir ama ka weyn, waxa aad furan kartaa *my* Social Security. Ee ***www.socialsecurity.gov/myaccount***, waxaad ka heli kartaa warbixinta Lambarka Bulshada in aad xaqiijiso dakhliga ku soo galay intii aad shaqeyneysay iyo qiyaasta lacagta hawlgabka, naafada ama dadka leh dhaxalkaaga ay qaadanayaan mustaqbalka. Waa in aad si taxadar leh u fiirisaa Warbixinta oo aad hubisaa in ay lacagtii saxda aheyd ku qoran tahay magacaaga iyo taariikhda dhalashadana ay sax tahay.

## Maxay muhim u tahay in dakhliga i soo gala si sax ah loo diiwaangeliyey?

Lacagta macaashka ee Lambarka Bulshada ee la siinayo adiga iyo qoyskaaga waxa ay ku xiran tahay dakhliga ku soo gala ee ku qoran diiwaankaaga. Haddii aan si sax ah loogu soo bandhigin dhamaan dakhliga ku soo gala, waxa ay keeni kartaa in macaash yar aad adiga iyo qoyskaagu heshaan.

## Sidee ayuu u maqnaan karaa dakhliga i soo gala?

Haddii dakhliga ka maqan diiwaanka Lambarkaaga Bulshada uu yahay sanadkan ama kii la soo dhaafay, haka walwalin. Waayo

dakhligaasi waa mid cusub, weli in aan lagu darin ayaa suurtagal ah. Waxa ay ka muuqan doonaan *Warbixinada* dambe.

Hase yeeshee, dakhliga wuu ka maqnaan karaa sanadihii hore sababaha soo socda dartood:

- Goobta shaqada oo dakhligaaga magac ama Lambarka Bulshada oo qalad ah noogu soo gudbisay.
- Dakhligaaga oo aan si sax ah naloogu soo gudbin.
- Xaas baad noqotay ama waad kala tagteen oo magacaaga bedeshay, laakiin marna uma aadan soo sheegin Lambarka Bulshada.
- Waxa aad shaqeysay adiga oo isticmaalaya Lambarka Bulshada oo aadan laheyn.

## Maxaan yeelayaa haddii dakhligeygu qalad yahay?

Haddii aad ogaato in dakhligaaga aanu diiwaanka kuwada qorneyn, waxa ugu horeeya ee aad sameyn karto waa in aad raadiso caddeyn muujineysa dakhliga. Caddeyntaas waxa ay noqon kartaa:

- Foomka W-2 (*Warbixinta Mushaharka iyo Canshuurta lagaa gooyey*);
- Canshuur celinta;
- Qeybta dambe ee jeegga ama warbixinta mushaharka;
- Diiwaankaaga gaarka ah ee mushaharka; ama
- Aqoonsiyada kale ee muujinaya in aad shaqeysay.

Haddii aadan helin akrin wax qoraal ah oo muujinaya dakhligaaga, xusuusnoow waxyaabaha soo socda oo qor:

- Halka aad ka shaqeysay;
- Magaca cidda aad u shaqeysay;
- Taariikhda aad shaqeysay;
- Imisa ayuu ahaa dakhligaaga; iyo
- Magaca iyo Lambarka Bulshada ee aad isticmaashay markii aad shaqeyneysay.

## Sidee ayaa Lambarka Bulshada kuu caawin karaa?

Marka aad soo ururiso qoraaladaada oo aad qorto liis ay ku qoran yihiin dhamaan macluumaadka aad xusuusan karto la soo xiriir Lambarka Bulshada. Waanu kaala shaqeyneynaa sidii loo sixi lahaa diiwaanka. Nidaamkaas waxa uu qaadan karaa muddo, taasoo ku xiran macluumaadka aad noo keento ee ka maqan dakhligaaga. Waxaa laga yaabaa in aan la xiriirno goobta shaqada ama aan kula soo xiriirno.

## La Xiriirka Lambarka Bulshada

Waxaa jira dhawr hab oo loola xiriiri karo Lambarka Bulshada, oo ay ka mid tahay barta internetka, telefoonka iyo in aad tagto xafiiska. Halkan waxa aan u joognaa in aan ka jawaabno su'aalahaaga oo aan kuu adeegno. In ka badan, Lambarka Bulshada waxa ay caawiyeen si ay maanta iyo mustaqbalka ugu guuleystaan iyagoo u fidiyey gargaar dhaqaale malaayiin dad ah oo halgan ugu jira nolosha.

### Booqo bartayada internetka

Sida ugu haboon ee meel kasta loogala soo xiriiro kaaro Lambarka Bulshada waa adiga oo soo booqda ***www.socialsecurity.gov***. Halkaas oo aad:

- Ka sameysan *my* Social Security xisaab oo aad kala socoto *Social Security Statement* (*Warbixinta Lambarka Bulshada*), ka hubiso lacagta aad shaqeysay, aad ka daabacan karto warqada xaqiijinta macaashka, ka bedeli karto lacagta bangiga laguugu shubo, aad ka daabacan karto foomka SSA-1099/1042S iyo kuwo kale;
- Ka codsan karto caawinaad dheeraad ah (Extra Help) ee ku saabsan daawada laguu qoro ee ceymiska caafimaadka ee Medicare;
- Waxa aad ka coddsan kartaa hawlgabka, naafada, iyo macaashka Medicare;
- Aad ka hesho nuqul ka mid ah daabacaadaha aan soo saarno;

*(rogad)*

- Aad ka hesho jawaabaha su'aalaha markasta la is weydiiyo; iyo
- Iyo kuwo kale oo dheeraad ah!

Adeegyada qaarkood waxa aad ku heli kartaa afka Ingiriisiga oo kaliya. Soo booqo barta Luqadaha kala duwan oo aad macluumaadka ku heli karto Af Soomaali. Waxaanu idiin heli karnaa tarjubaano lacag la'aan ah oo idinka caawin kara waxyaabaha aad uga baahan tihiin Xafiisyada Lambarkaaga Bulshada Waxa aan kuu heli karnaa tarjubaan haddii aad na soo wacdaan ama aad soo booqataan Xafiiska Lambarka Bulshada.

## Nagala soo xiriir

Haddii aadan heli karin internetka, waxaa jirta adeegyo dhameystiran oo aad telefoonka ku heli karto, 24ka saac, 7da cisho ee todobaadka. Nagala soo xiriir telefoonka lacag la'aanta ah ee **1-800-772-1213** ama numberka TTY, **1-800-325-0778**, haddii aad dhagaha la' dahay ama maqalku kugu adag yahay.

Haddii aad dooneyso in qof aad la hadasho, waxa aan telefoonka ka jawaabnaa inta u dhaxeysa 7da aroornimo ilaa 7da fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Waxaanu ku weydiisaneynaa in aad dulqaadato mudada aan mashquulsanahay oo telefoonadu badan yihiin ama aad mudo dheer khadka ku jirto. Waxaanu rajeyneynaa on aan kuu adeegno.



**Social Security Administration**
Publication No. 05-10081-SO | July 2017
Sidee Loo Saxaa Diiwaanka Lambarka Bulshada
How To Correct Your Social Security Earnings Record (Somali)
Produced and published at U.S. taxpayer expense
Waxaa lagu soo saaray oo lagu daabacay lacagta canshuur bixiyayaasha